

Ogaysiiska Sanadkii ee Qiimaynaha Dhammaadka Gobolka Oregon oo Dhan ee Fanka Luuqadda Ingiriisida iyo Xisaabta

XOOJINTA SINNAANTA IYO XARIIFNIMADA ARDAY KASTA

Oregon waxa ka go'an inay arday kasta u diyaariso aqoonta iyo xirfadaha daruuriga u ah guulaysiga dugsiga sare kadib. Qiimaynaha gobolka Oregon oo dhan ee Fanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta waxay si buuxda u waafaqsan yihiin Heerarka Gobolka Oregon waxayna siiyaan ardayda fasalada 3-8 iyo 11, iyo qoysaskooda, hal wax oo ay ku cabbiraan tacliinta, guulaysiga iyo korriinka.

QIIMAYNAHA OREGON EE GOBOLKA OO DHAN...

- ...waxa dejiyey barayaal ku sugan Oregon iyo dhawr gobol oo kale
- ...waxay ku cariyaan ilmahaaga inuu si naqdi leh u fekeru kuna dabbaqo aqoontiisa meelo kala duwan
- ...waxay dhaafsiisan yihiin su'aalaha ka-doorada oo waydiiyaan ilmaha inuu faahfaahiyo jawaabaha
- ...waxay u dhaqmaan sidii sawir muujinaya horumarka ilmahaaga kaasi oo lala isticmaali karo macluumaadyo kale si loo go'aamiyo guusha tacliineed ee ilmahaaga
- ...waxay ka caawiyaan dugsiyada iyo degmooyinka inay qiimeeyaan nidaamyadooda waxbarista iyo waxbarashada, sidoo kalena aqoonsadaan kooxaha ardayda ah ee baahiyaha tacliineed ee ay qabaan aan si ku filan loo dabooli karin
- ...waxay ka caawiyaan bulshooyinka inay fahmaan heerka tayada waxbarashada dugsiyada dawladda

SHARRAXAADAHA XUQUUQDA

Sharciga Oregon (ORS 329.479) wuxuu u saamaxayaa waalidiinta iyo ardayda waawayn inay si sanadle ah u diidaan qiimaynaha gobolka oo dhan ee Oregon ee Fanka Luuqadda Ingiriisida (ELA) iyo/ama Xisaabta iyadoo u gudbinaya foom sanadle ah dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsiyadu waxay siin doonaan waalidiinta foomka ku habboon ugu yaraan 30 maalmood kahor inta imtixaanku aanu bilaabmin.

Maxay kaqaybqaadashada ilmahaagu muhiim u tahay?

Iyadoo qiimayn kaliya ayna ka bixin karin sawir buuxa horumarka ilmahaaga, qiimaynaha gobolka oo dhan waxay siiyaan barayaasha iyo maamulayaasha Oregon hal meel oo ay ka helaan macluumaadka ku saabsan waxay yihiin qaababka waxbarasho ee shaqaynayaa iyo halka khayraad dheeraad ah loo baahan karo. Kaqaybqaadashada ilmahaagu waa muhiim si loo hubiyo dugsiyada iyo degmooyinku inay aqoonsadaan meelaha ay buuxinayaan baahiyaha guud ee ardayda, iyo sidoo kale inay aqoonsadaan meelaha korriinku ka jiro.

Goorma ayuu ilmahaagu gali doonaa imtixaanka?

Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee ilmahaagu uu gali doono qiimaynaha inta lagu jiro wakhtiga uu imtixaanka gobolka oo dhan uu socdo.

WAKHTIGA IMTIXAANKA GOBOLKA OO DHAN

Wakhtiyada imtixaanka gobolka oo dhan ee Fanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta waxay khuseeyaan qiimaynaha dhammaadka gobolka oo dhan ee guud iyo kuwa badiilka ah.

Fasalada 3-8	Fasalada 9-12
03/07/2023 — 06/02/2023	01/10/2023 — 06/02/2023

XOGOGAAL AHAW

Booqo webbejka Oregon ee Starting Smarter (<https://or.startingsmarter.org>) si aad wax badan uga ogaato waxay tahay ilmahaagu inuu ogaado uuna awoodo inuu ka sameeyo Fanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta, si aad u aragto tusaalayaal su'aalaha qiimaynta ah, iyo si aad u akhrido wax badan oo ku saabsan natiijooyinka imtixaanka ee ilmahaaga. La xiriiir macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga wixii su'aalo ah.